



Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

## **Ku dhawaaqida Maamulaha Cusub ee Dugsiga Hoose ee Markham, Traniece Brown-Warrens**

**Juun 2022**

Bulshada qaaliga ah ee Markham:

Waan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqo in Traniece Brown-Warrens ay noqon doonto maamulaha cusub ee Dugsiga Hoose ee Markham.

Traniece waxay la timaadaa Markham oo wadata resume cajiib ah oo ay ku jiraan fasalo kala duwan iyo jagooyin maamul. Sannadkii la soo dhaafay, waxa ay kaaliyaha maamule ka ahayd Dugsiga Dhexe ee Jackson, halkaas oo ay iyadu ahayd tababaraha kooxda kubbadda cagta ee fasalka 7aad iyo 8aad, marka lagu daro u shaqaynta kaaliyaha tababaraha kooxda kubbadda kolayga haweenka ee Ida B. Wells. Jackson markay joogtay waxay abuurtay oo ay marti galisay podcast-ka JagsWired, oo ay wada-abuurtay kooxda Black Girl Magic. Intaa ka hor, waxay lataliye uga soo noqotay Jason Lee Elementary School ee NE Portland.



Traniece waxa ay shaqadeeda waxbarashada ka bilawday iyada oo ah macallimad cilmiga bulshada ee Houston. Waxay sidoo kale u adeegtay maamule iyada oo si gaar ah u danaynaysa tababarka macallimiinta iyo horumarinta xirfadda.

Waxay shahaadada koowaad ee jaamacadda ka haysataa cilmi-nafsiga ee Jaamacadda Gobolka California - Sacramento iyo shahaadada mastarka ee waxbarashada Jaamacadda Liberty. Hadda, waxay EdD ku dhammaystiraysaa Jaamacadda Baylor.

Fadlan igu soo biir soo dhawaynta Maamule Brown-Warrens ee bulshada Markham.

Dr. Cheryl Proctor,

Ku-xigeenka Kormeeraha Guud, Waxbarashada iyo Bulshooyinka Dugsiga